



Shaqada ay qabteen macallimiinta farshaxanka PPS oo loo xushay bandhig

Macallimiinta farshaxanka Dugsiyada Dadweynaha Portland, kaliya dadka wax ma baraan – ee kuwo badan ayaa ah farshaxaniistayaal sida ay isku arkaan. Afar macallimiin oo ka tirsan PPS ah ayaa ka mid ahaa 30 macallin oo ka kala yimid Oregon oo loo soo xushay in shaqadooda lagu soo bandhigo bandhigga “Macallimiinta Farshaxaniistayaasha ah – Ka dib Muujintii Farsamadooda” oo hadda yaala Madxafka Maryhill ee Farshaxanka ee ku yaala Goldendale, Washington.

Bandhigga, oo la soo bandhigay iyada oo la kaashanayo Ururka Waxbarashada Farshaxanka ee Oregon, waa mid la garsoorayo -- oo macnaheedu yahay in macallimiintu ay tahay in codsadaan isla markaana ay soo xushaan – Dana Carlyle-Kletchka, oo Kaaliye Macallin oo Sare ka ah Madxafka Waxbarashada Farshaxanka ee ku yaala Jaamacadda Gobolka ee Ohio.

Jill Mitchell oo ka tirsan Dugsiga Hoose ee Rieke ayaa la siisay abaalmarinta magacaabista sharaf leh taasi oo loogu talagalay farshaxankeeda alwaaxa ku dul sawirran, [“Succulent Study #2.”](#) Mitchell waxay sidoo kale leedahay shaqo farshaxan oo ay qabatay, [“Perfect Fruit,”](#) oo bandhigga yaalay.

Jamin London-Tinsel oo ka tirsan Dugsiga Sare ee Grant ayaa la siisay abaalmarinta Doorashada Ilaalihaha Madxafka taasi oo loogu talagalay shaqadeeda ay qabatay, [“Repair.”](#) Waxay ahayd maamuuskii labaad ee la xiriirta OAEA ee ay London-Tinsel heshay sanadka, taasi oo ay weheliso in [loo magacaabay Macallimada Dugsiga Sare ee Sanadka.](#)

Laba macallin oo kale oo ka tirsan PPS ayaa yeeshay laba shaqooyinka dhanka farshaxanka ah oo loo xushay in la soo bandhigo: Marie Pearson oo ka tirsan Dugsiga Sare ee Wilson, [“The Trees of Eagle Creek”](#) iyo [“Me & Bee”](#); iyo Anna Mafchir oo ka tirsan Dugsiga Hoose ee Vernon, [“On a Walk in an Unforgettable Land,”](#) iyo [“Once Upon a Time.”](#)

Bandhigga, oo furmay Oktoobar 1, wuxuu sii socon doonaa in la soo bandhigo ilaa laga gaarayo Noofambar 15. Fiiri [Webstie-ka Madxafka Maryhill](#) wixii la xariira macluumaaadka saacadaha iyo gelitaanka.